

Refugee agencies help and advice



July 2007

Somali

Daymaha Dejinta

Ma lagu siiyay ogalaansho qaxootinimo (refugee status) ama badbaadin bini'aadan (humanitarian protection) ilaa 11-kii Bishii Lixaad 2007? Haddii ay haa tahay, waxa laga yaabaa inuu kuu banaan yahay daynta dawladda ee dejinta (integration loan).

Waa maxay dayn dejin?

Daymaha dejintu waa daymo aan lahayn dulsaar si qaxootiga iyo dadka la siiyay badbaadin bini'aadan u awoodaan inay nolol cusub ka bilaabaan Boqortooyada Midowday (UK). Fadlan la soco in tani tahay dayn taasoo lagaa rabo inaad bixisid mustaqbalka.

Maxaa loo isticmaali karaa daynta?

Waxyaabaha aad dayn ugu baahan kartid waxa tusaale ahaan ka mid ah: Carbuunta ama deebaajiga guryaha; alaabta guriga muhiim u ah; kaadhahka safarka si aad u tagtid wareysiyada ama shaqo; dhar ama qalab shaqo; waxbarasho iyo shahaadooyin. Waxa aad codsan kartaa dayn aad iska bixisid kharashyada nolosha ee aasaasiga ah haddii aad ku jirtid tababar ama waxbarasho. Daymaha looguma talogalin inay daboolaan alaabta aan daruuriga ah.

Ayaa heli kara dayn dejin?

Si aad u codsatid dayn, waa inaad ka weyn tahay 18 jir oo lagu siiyay ogalaansho qaxootinimo ama badbaadin bini'aadan. Dayn ma codsan kartid wax ka badan hal mar. Haddii adiga iyo wehelkaagu labadiinuba aad xaq u leedihiin inaad codsataan dayn, waxa aad codsan kartaan wada-jir ahaan. Labada isku wehelka ah si siman ayay mas'uul uga yihiin dib-u-bixinta daynta wada-jirka ah.

Intee in leeg ayaan codsan karaa?

Qadarka daynta ah waxa la xisaabin doonaa iyada oo la eegayo baahiyahaaga gaarka ah iyo xaaladda. Waxa laga yaabaa inay noqoto mid u dhexeysa £100 iyo £1000. Waxa tani khuseysa codsiyada kali ah iyo kuwa wada-jirka ah labadaba.

Registered charity numbers: Refugee Action: 283660 Migrant Helpline: 1088631
Scottish Refugee Council: SC008639 Refugee Council: 1014576 Welsh Refugee Council: 1044885

Ooraalo yaryar oo kale waxa laga heli karaa barta <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Document control: Refugee Action, review date: December 2007



Sidee baa lagu siin doonaa daymaha?

Daymaha caadi ahaan waxa laguugu shubi doonaa xisaab bangi. Haddii aanad lahayn xisaab bangi oo dayntaaduna ka yar tahay £450, waxa lagu siin karaa jeeg. Kan waxa kaliya ee laga sarifan karaa Xafiiska Boosta ee aad ku sheegtid warqaddaada codsiga.

Sidee baa daymaha la iskaga bixin doonaa?

Iska-bixinta dayntu waxay caadi ahaan bilaabmi doontaa ka dib lix todobaad. Haddii aad shaqaysid, Wasaaradda Shaqada iyo Beshanka (Department for Work and Pensions) ayaa si toos ah kuula soo xidhiidhi doonta si looga hadlo arrintan. Haddii aad qaadatid Taageerada Dakhliga (Income Support), ama Gunada Shaqo-doonka ee ku Saleysan Dakhliga (Income-Based Jobseeker's Allowance) ama Deeqda Hawlgabka (Pension Credit), waxa lacagta bixinta daynta si toos ah looga goosan doonaa gargaarkaaga (benefits). Qadarka dib-u-bixinta waxa laga dhigi doonaa mid si weyn u hooseeya.

Xaq ma u yeelan doonaa taageero dhaqaale oo kale?

Haddii dayntu aad u rabsid inay kaa gargaarto tababar dheeraad ah, waxbarasho ama shaqo, oo uu ku jiro kharashyada nolosha ama sii-haynta ilmaha, waa inaad marka hore kala hadashid xafiiskaaga shaqada (Jobcentre Plus). Waxa laga yaabaa inay jiraan noocyo kale oo ah taageero dhaqaale oo aad heli kartid kharash la'aan.

Sida loo codsado dayn

Waa in Hay'adda Xuduudka iyo Imigarayshanku (Border and Immigration Agency) kuu soo dirtay warqadda codsiga dayn dejin taasoo la socotay warqadda go'aanka ee ku siinaysay ogalaansho qaxootinimo ama badbaadin bini'aadan. Haddii aanad helin, waxa aad heli kartaa haddii aad Kooxda Daynta Dejinta (Integration Loan Team) ee Hay'adda Xuduudka iyo Imigarayshanka ka wacdid 020 8196 5440.

Hay'adaha qaxootiga sida Waxqabadka Qaxootiga (Refugee Action), Khadka Gargaarka Sooguuraaga (Migrant Helpline), Golaha Qaxootiga Iskootishka (Scottish Refugee Council), Golaha Qaxootiga (Refugee Council) iyo Golaha Qaxootiga ee Welshka (Welsh Refugee Council) ayaa laga yaabaa inay kaa gargaaraan buuxinta warqadda codsiga. Waxa kale oo laga yaabaa in hay'ado kale sida hay'adaha qaxootiga ee beesha ama adeegga La-talinta Muwaadinka (Citizen's Advice) ay iyaguna ku gargaari karaan.

La-talin ku Saabsan Lacag

Xusuuso in lagaa rabo inaad dib u bixisid daynta sidaa daraadeed waxa muhiim ah inaad amaahatid kaliya wixii aad awoodid inaad iska bixisid. Waxa laga yaabaa inaad xaq u leedahay maalgalin aad ka heshid illo kale taasoo aan lagaa rabin inaad dib u bixisid. Fadlan arrintan kala hadal hay'addaada qaxootiga ee kuugu dhow.